# Kaalmada Maaliyadeed Tilmaamaha Foomka Codsiga

Tani waa codsiga kaalmada maaliyadeed (sidoo kale loo yaqaano sida daryeelka deeqda) xaga PeaceHealth

PeaceHealth waxay bixisaa kaalmada maaliyada oo waafaqsan gobolka iyo federaalka shuruudahooda oo la siiyo dadka iyo qoysaska kuwaas oo buuxiya shuruuaha dakhliga. Waxaad u qalmi kartaa daryeel lacag la'aan ah ama daryeel qiimo jaban iyadoo lagu saleynayo tirada qoyskaaga iyo dakhligaaga xitaa haddii aad leedahay caymis caafimaad.

Si aad u aragto Xeerka Kaalmada Maaliyadeed ee PeaceHealth iyo macluumaadka dheeraadka ah, fadlan booq **peacehealth.org**.

**Maxay kaalmada maaliyadeed daboolaysaa?**
Kaalmada dhaqaale ee isbitaalku waxay daboolaysaa baahiyaha ku haboon adeegyada ku saleysan isbitaalka oo ay bixiso PeaceHealth iyadoo ku xiran u qalmitaanka. Kaalmada maaliyadeed waxaa laga yaabaa inaysan dabooli dhammaan kharashyada daryeelka caafimaadka, oo ay kamid yihiin adeegyada ay bixiyaan ururada kale.

**Haddii aad qabto su'aalo ama u baahan tahay caawimada buuxinta codsigan:** Fadlan kala xiriir Adeega Macmiilka lambarka 877-202-3597. Waxaad caawimaad ku heli kartaa sabab kasta, ay ku jirto naafanimada iyo kaalmada luuqada.

**Si codsigaaga loo habeeyo, waa inaad:**

- Na sii macluumaad ku saabsan qoyskaaga.
- Buuxi tirada xubnaha qoyska ee qoyskaaga (qoyska waxaa kamid ah dadka qaraabo kaala ah dhalasho, guur, ama korsasho oo kula nool).
- Na sii macluumaad ku saabsan dakhliga guud ee bishii ee qoyskaaga (dakhliga kahor canshuurta iyo lacag jarista).
- Bixi dukumentiyo ku saabsan dakhliga qoyska.
- Ku lifaaq macluumaad dheeraad ah haddii loo baahdo.
- Saxeex oo taariikhda ku qor foomka.

**Fiiro Gaar ah: Waa inaanad bixin lambarka Sooshal Sekuuritiga si aad u codsato kaalmada maaliyadeed.** Haddii aad nasiiso lambarkaaga Sooshal Sekuuritiga waxay naga caawin doontaa dadajinta ka go'aan gaarista codsigaaga. Lambarada Sooshal Sekuuritiga waxaa loo isticmaalaa in lagu xaqiijiyo macluumaadka nala siiyay. Haddii aadan lahayn lambarka Sooshal Sekuuritiga, fadlan saar calaamad «ma haboona» ama «M/H.»

**Kusoo dir boosto, iimayl ama fakis ahaan codsiga la dhammaystiray dhammaan caddaymaha adigoo kusoo hagaajinaya:** PeaceHealth Patient Financial Services, PO Box 748632, Los Angeles, CA 90074- 8632.
Iimaylka: financialassistance@peacehealth.org
Fakis: (360) 729-3047. Kala har koobi adiga kuu gaar ah.

**Si aad codsigaaga noogu soo gudbiso si toos ah:** Fadlan kala xiriir Adeega Macmiilka ee goobta kuugu dhow lambarka 877-202-3597.

Waxaanu kugu wargelin doonaa adiga go'aankii u dambeeyay ee u-qalmitaanka iyo xuquuqaha rafcaan qaadashada, haddii ay haboon tahay,14 maalmood gudahood ee helitaanka codsiga kaalmada maaliyada ee dhammaystiran, sida dukumentiyada cadeynaya dakhliga.

*Soo gudbinta codsiga kaalmada maaliyadeed, waxaad ogglaansho noo siisaa anga inaanu samayno waydiimaaha udub dhexdaadka u ah si loo xaqiijiyo waajibaadka maaliyada ama macluumaadka.*

Waxaan diyaar u nahay inaan idin caawino. Fadlan u soo gudbi codsigaaga si degdeg ah! Waxaad heli doontaa biilashaada ilaa aad nooga soo gudbiso macluumaadka aan kaaga fadhino.

PeaceHealth

# PeaceHealth Foomka Kaalmada Maaliyada - *QARSOODI*

*Fadlan bixi jawaabaha su'aal kasta. Haddii aanay ku habboonayn, ku qor "NA" Ku lifaaq bogga dheeraadka ah haddii loo baahdo.*

**FADLAN BOOSTA KU DIR CODSIGA LA DHAMMAYSTIRO PEACEHEALTH, PO BOX 748632, LOS ANGELES, CA 90074-8632**

Guarantor Number: ____

## MACLUUMAADKA BAADHIDA

Miyaad u baahan tahay turjubaan? ❑ **Haa** ❑ **Maya** *Haddii Haa, qor luqadda aad doorabidayso:* ______

Miyaa bukaanku helaa adeegyada kaalmada gobolka ee dad waynaha sida Medicaid, TANF, Basic Food, ama WIC?? (IKHTIYAAR AH) ❑ **Haa** ❑ **Maya**

Bukaanku hadda ma yahay hoy la'aan? ❑ **Haa** ❑ **Maya**

Miyaa daryeelka bukaanka baahidiisa caafimaadku la xidhiidhaa shilka baabuurka ama dhaawaca shaqada? ❑ **Haa** ❑ **Maya**

## FADLAN OGOW

*Ma damaana qaadi karno inaad u qalmi doonto kaalmada maaliyada, xataa haddii aad codsado.*
*Markaad soo dirto codsigaaga, waxaanu hubin karnaa dhammaan macluumaadka oo waxaanu dalban karnaa macluumaa dheeraad ah ama caddaynta dakhliga.*

## MACLUUMAADKA BUKAANKA IYO CODSIGA

Magaca Koobaad ee Bukaanka ____ | Magaca Dhexe ee Bukaanka | Magaca Dambe ee Bukaanka ____

❑ Labka❑ Dhediga
❑ Kala *Caddayn Kara:* ____

Taariikhda dhalashada

Lambarka amniga Sooshalka (looma baahna)

Qofka ka Masuulka ee Bixinta Biilka ____

Xidhiidhka lala leeyahay Bukaanka ____

Taariikhda dhalashada ____

*Fiiro: Waa inaanad bixin lambarka amniga ee Shooshalka si aad u codsato kaalmada maaliyada*

Cinwaanka Boostada ____

Lambarka(ada) Xidhiidhka Muhiimka ah

Magaalada | Gobolka | Koodhka Sibka

____) ______
____) ______

Cinwaanka Iimaylka:

Heerka shaqada ee qofka ka masuulka ah bixinta biilka

❑ **La shaqaaleeyay** *Taariikhda shaqaalaynta:* ____ ❑ **Aan shaqayn** *Intee jeer shaqo la'aan ah:* ____

❑ **Iskii u shaqaysta** ❑ **Arday** ❑ **Naafo** ❑ **Hawl gab ah** ❑**Kale:** ____

## MACLUUMAADKA QOYSKA

Qor xubnaha qoyskaaga ku jira, ay ka mid yihiin adiga."Qoyska" ay ku jiraan dadka kula xidhiidha dhalashada, guurka, ama korsiga wada nool.

**TIRADA QOYSKA** ____ *Isticmaal warqad dheeraad ah haddii loo baahdo.*

| Magaca | Taariikhda Shalashada | Xidhiidhka lala leeyahay bukaanka | Haddi 18 sanadoo jir ama ka wayn: Magaca loo shaqeeyaha(yaasha) ama halka dakhligu ka soo galo: | Haddii 18 sanadoo jir ama ka wayn: Wadarta BUUXDA Dakhliga bilaha ah (ka hor cashuuraha): | Sidoo kale codsanaya maaliyada kaalmada ah? |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |

**Dhammaan xubnaha qoyska dakhligoodu waa in la shaaciyo oo la caddeeyo ay ku jiraan codsiga la dhammaystiray. Tusaalooyinka isha dakhliga waxaa ku jira:**

■ Mushaharka ■ Shaqo la'aant a ■ Iskaa u shaqaysiga ■ Magdhowga Shaqaalaha ■ Naafada ■ SSI ■ Taageerada ilmaha/xaaska
■ Barnaamijka waxbarashadda shaqada (ardayda) ■ Lacagta hawl gabka ■ Qaybinta kootada shaqo la'aanta ■ Kale *Fadlan sharax:* ____

## MACLUUMAADKA DHEERAADKA AH

Fadlan isticmaal boggag dheeraad ah haddii ay jiraan macluumaad kale oo ku saabsan xaalada maaliyada hadda aad jeclaan lahayd inaan ogaano, sida dhibta maaliyada, kharashyada caafimaadka xad dhaafka ah, dakhliga xiliyeed ama ku meel gaadhka ah, ama waayida gaarka ah.

## HESHIISHKA BUKAANKA

- Waaan fahmayaa in PeaceHealth ay xaqiijin karto macluumaadka iyaddoo dib u eegaysa macluumaadka qadarinta iyo helid amacluumaadka ka yimid ilaha kale si loo kaalmeeyo go'aan gaadhida u qalmida kaalmada maaliyada ama qorshayaasha lacag bixinta.
- Waxaan caddaynayaa in macluumaadka sare uu run yahay oo sax yahay ilaa inta aqoontayda ugu wanaagsan. Waxaan fahmayaa haddii macluumaadka aan bixiyo loo go'aamiyo inuu been yahay, natiijada waxay noqon kartaa diidmada kaalmada maaliyada, oo waxaan ka masuul ahaan doontaa oo lagaa filayaa inaan bixiyo adeegyada la bixiyay.
- Gudbinta codsiga kaalmada maaliyada, waxaad oggolaanshaha noo siisaa anga inaanu samayno waydiimaaha lama huraanka ah si loo xaqiijiyo waajibaadka maaliyada ama macluumaadka.

______________________ ______________________
Saxeexa Qofka Codsanaya Taariikhda

**Haddii aad qabto su'aalo ama u baahan tahay caawimada buuxinta codsigan: Fadlan kala xidhiidh Adeega Macmiilka lambarka 877-202-3597. Waxaad caawimo heli kartaa sabab kasta, ay ku jirto naafanimada iyo kaalmada luqadda. Si loo arko PeaceHealth Xeerkeeda Kaalmada Maaliyada iyo macluumaadka dheeraadka ah, fadlan booqo peacehealth.org.**

**FADLAN BOOSTA KU DIR CODSIGA LA DHAMMAYSTIRO PEACEHEALTH, PO BOX 748632, LOS ANGELES, CA 90074-8632**